# PAGLIACCI

**Waqtiga: 1948**
**Goobta: Tuulo ku taal Calabria, Talyaaniga**

**Qaybta I aad**
Dadkii magaalada waxay soo dhawaynayaan koox fanaanin ah oo socdaal ku imaanaya: hogaamiyaha Canio, xaaskiisa Nedda, iyo labo ka mid ah majaajilayaal kale, Tonio iyo Beppe. Canio wuxuu ku casuumaa qof walba inuu yimaado bandhiga fiidkii, dadka tuulada waxay isaga ku casuumaan inuu la cabo cabitaan. Hal nin ayaa ku maaadeysanaya in Tonio fursad u helaayo inuu soojiito Nedda. Canio, oo si lama filaan ah u murugsan, wuxuuna u sheegay ninkaasi in daacadnimada xaaskiisa aysan ahayn arrin lagu qoslo.

Markii uu tago, Nedda oo cabsanaysa ayaa ka walwalsan hinaasaha daran ee Canio. Iyadoo la yaabban shimbiraha, waxay ku heesaysaa sida ay ugu masayrto xorriyaddooda. Tonio ayaa dhageysanaya heesteeda. Isagoo dareen qaadey, ayaa wuxuu ka codsanayaa in ay jeclaato. Waa ay iska caabinaysaa, isagoo xanaaqsan ayuu iskaga tagaya, isla markaana Silvio, oo ah jaceylkeeda dhabta ah oo tuulada degan, ayaa soo ordaya. Inkasta oo Silvio si daran uga codsaday in uu la baxsado, Nedda markii hore way diidaysaa, iyadoo ka baqaysa waxaa Canio laga yaabo in uu sameeyo. Ugu dambeyntii, waxay ku qancaysaa inay ka baxsato Canio.

Tonio, oo ka xanaaqsan in Nedda ay diiday jacaylkiisa, wuu soo noqonaya wuxuuna arkaya lammaanaha. Wuxuu u cararayaa inuu u soo waco Canio. Labada nin waxay imaanayaan waqtigii loogu talagalay in Canio uu maqlo Nedda oo balan qaadaysa inay la kulmi doonto Silvio saqda dhexe. Canio wuxuu weeraraa ninka dhalinyarada ah, laakiin wuu baxsanaya. Nedda waxay diidaysaa inay u sheegto Canio magaca jaceylkeeda. Waxay u dhaqaaqaysaa inay u diyaar

garoowdo bandhigga. Beppe wuxuu u sheegayaa Canio inuu isku diyaariyo inuu ciyaaro Pagliaccio. Isagoo xanaaq iyo ciil la daaladhacaya, Canio wuxuu isku diyaariyaa bandhigga.

### Xakad

### Qaybta II aad

Dadka tuulada waxay isugu imaanayan majaajillada caanka ah ee ku saabsan Pagliaccio iyo Columbine, oo ah sheeko nin ay xaaskiisa si xun u khiyaamaynaysa. Kulanka dhex maraya Columbine (oo ay ciyaarayso Nedda) iyo jaceylkeeda Harlequin (oo ay ciyaarayso Beppe) ayaa carqaladeeynaya Pagliaccio (Canio). Bandhiggu wuxuu u soconayaa sidii la filayay ilaa iyo Canio oo waalan uu masraxa soo fuulo. Wuxuu dalbanayaa in uu ogaado magaca jaceylka Nedda. Iyadoo si naxdin leh isku dayaysa inay majaajillada sii waddo, Canio ayaa xad ka sii baxaya. Dadka daawanaya waxay ugu sacbinayaan xaqiiqada ay u maleynayaan matalaadiisa. Nedda waxay sii wadaysaa inay Canio ka hortagto, iyadoo ku ooyaysa inay marnaba u sheegi doonin magaca. Markii uu ka baxo xadkiisa, Canio wuxuu mindi gelinaya iyada. Silvio wuxuu u soo ordayaa masraxa si uu u badbaadiyo Nedda, laakiin Canio wuu dilaa isna. Dadka daawanaya ee argagaxsan waxaa loo sheegay in majaajilladii ay dhammaatay.